

Nolosheyda ugu wanaagsan: Agab aad ugu sheegayso dadka kale sida aad dareemayso

Xog ku saabsan agabkan

Waxaad u adeegsan kartaa dukumiintigaan in aad ugu sheegto dadka kale waxa aad u baahan tahay si aad ugu noolaato nolol raaxo leh. Waxaa ku qoran bogaga soo socda waxyaabo ay dad badan u arkaan kuwo muhiim ah. Waxaa jira meelo banaan oo dheeri ah si aad ugu qorto waxyaabaha laga yaabo inaan la sheegin. Marka aad ka jawaabto su'aal kasta, waxaad la wadaagi kartaa xogtaan dadka ku taageera kadibna waxaad ka codsan kartaa inay kaa caawiyaan wax kasta oo aad u baahan karto.

Tilmaamaha

1. Sanduuq kasta oo ku yaal bogaga soo socda, dooro sida aad u aragto mid kasta.
2. Kadib marka aad ka jawaabto su'aalaha, la wadaag agabkan dadka ku daryeelaaya.
3. Ka codso inay kaa taageeraan wax kasta oo aad ku calaamadaysay "fadlan i caawi."
4. Sidoo kale ka codso taageero ku aadan wax kasta oo aad ku qortay qaybta "wax kale".

Haddii aad u baahan tahay caawimaad si aad u buuxiso dukumiintigaan, ka codso caawimaad qof aad ku kalsoon tahay aadna kuu yaqaana adiga.

Tusaale

Waxyaabaha hagaajin kara nololshaada: Waxaan si joogto ah waqti ula qaataa dadka aan la wadaago qiyamkayga ina daryeela.


























Jawaabaha macquulka ah:






















Fadlan i caawi 😞	Ma aqaano ama ima qusayso 😐	Wax kasta waa caadi 😊
Haddii aad dareemayso kelinimo ama aadan booqan dadka aad jeceshahay marar badan	Haddii aadan hubin ama haddii aysan su'aashu muhiim kuu ahayn	Haddii aad si joogto ah ula kulanto dadka aad jeceshahay














Dookh kale











Haddii loo baahdo, agabkaan ayaa wadata dukumiinti kale, *Tayada Nololsha: Agab loogu tala galay daryeel bixiyaasha*, oo ay adeegsadaan dadka aan adeegsan erayada si ay u hadlaan ama laga yaabo inaysan awoodin inay u sheegaan dadka kale sida ay dareemayaan.
















Waxyaabaha hagaajin kara noloshayda

























Dookhyada	Fadlan i caawi	Ma aqaano ama ima qusayso	Wax kasta waa caadi
Aniga ayaa maamula dhaqaalaheyga, ama (haddii aan caawimaad u baahanahay) Aniga ayaa maamula sida aan u adeegsanaayo lacagta iisoo harta ee baashaalka			
Nashaadaadka la i siiyo waxay waafaqsan yihiin dhaqankayga ama dookhyadeyda kale ee shaqsiga ah.			
Waxaan haystaa agab shaqsi ah oo ka turjumaaya dhaqankayga ama waxyaabaha aan xiiseynaayo (tan waxaa ku jiri kara ciyaaraha, muusiga, agabka farshaxanka, iwm.)			
Meesha aan daganahay waxaa loo goglay loona sharxay qaabka aan doonaayo waxaana yaala waxyaabo farxad leh, oo xiiso badan			
Waxaan leeyahay dhar muujinaaya qaabkayga gaarka ah iyo aqoonsigayga jinsiga			
Waxaan awoodey inaan doorto meesha aan ku noolahay, ama waxaa la i siiyay adeegyada taageerada dheeriga ah si aan ugu guuro meel cusub.			
Waxaan awoodey inaan doorto cida aan la noolaanaayo ama haddii aan keligeys noolaanaayo, ama waxaa la i siiyay adeegyada taageerada dheeriga ah si aan ugu guuro meel cusub.			
Maalin kasta, waxaan awoodaa inaan booqdo dad aan ahayn shaqaalaha (booqashadaan ayaa noqon karta mid fool-ka-fool ah, khadka taleefanka, wada sheekaysiga muuqaalka ah, iwm.)			
Ugu yaraan halmar sanadkii, waxaa la i siiyaa fursado aan u xusho fursadaha kaladuwan ee shaqada ama mutadawacnimada ee aan dooni karo, ayna ku jiraan fursado si aan u badelo shaqooyinka ama shaqooyinka mutadawacnimada ah			
Waxaan go'aansadaa sida aan u adeegsanaayo maalintayda (ka reebitaanada waxaa ku jiri kara cimilo xun, daryeel caafimaad, dugsi, iwm.)			
Waxaan haystaa dookhyo badan maalin kasta oo aan ku go'aansado xiliga aan samaynaayo waxyaabaha			
Waxaan awoodaa inaan si madax banaan u xusho cuntooyinka aan cunaayo iyo cadadka aan cunaayo			
Waxaa la siiyay fursado aan ku kala xusho diimaha kaladuwan aana ku doorto diinta aan doonaayo inaan ka qeyb ahaado, ama inaan wax diin ah ku dhaqmin			
Waxaan doortay hiigsiyada waxbarashada ee qorsheyaashayda			










Taageerada aan ka helo kooxdayda	Fadlan i caawi	Ma aqaano ama ima qusayso	Wax kasta waa caadi
Waxaa si joogto ah la ii siiyaa nashaadaad aan ku raaxaysto			
Waxaan helaa adeegyada taageerada oo igu filan iyo shaqaale ii sameeya waxyaabaha aan jeclahay			
Waxaan kalsooni ku qabaa in aan ku guulaysan karo yoolalkayga iyo inaan haysto taageero igu filan oo aan sidaas ku sameeyo			
Waxaan haystaa qorshe qoran oo iga caawinaaya inaan helo madax banaani badan, waxaana helaa taageero igu filan si aan u gaaro qorshahaas			
Waxaan aaminsanahay in dadka i taageera ay u fuliyaan qorsheyaashayda sida aan ka doonaayo inay u fuliyaan			
Dadka i taageera ayaa yaqaana sida ay ii caawinayaan marka aan walaacsan nahay			
Dadka i taageera ayaa yaqaana sida ay iiga caawinayaan dhacdooyinka xasuusta xun igu reebay ee aan soo maray (xasuusta xun ayaa noqon karta waxyaabaha sida jirdilka, takoorka isirka ama qaabab kale ku saleysan, dayaca, rabshada, iwm.)			

Waxyaabahayga	Fadlan i caawi	Ma aqaano ama ima qusayso	Wax kasta waa caadi
Waxaan haystaa lacag igu filan ama khayraad kale si aan u helo waxyaabaha aan u baahan nahay iyo waxyaabaha qaar ee aan doonaayo, ama waxaan leeyahay qorshe qoran si uu iiga caawiyo inaan helo xasilooni dhaqaale			
Waxaan leeyahay aana u helaa si aan xadidnayn agabkayga shaqsiga ah ee muhiimada wayn ii leh (kan waxaa ku jiri kara taleefanka gacanta, kaarka baaska, baaskiilka, ciyaaraha muuqaalka ah, kumbuyuutar, iwm.)			
Alaabtayda way qadariyaan shaqaalaha mushaarka qaata, dadka qolka ila dagan iyo dadka nasoo booqda			
Waxaan haystaa dookhyo badan oo ku aadan dharka aan xiranaayo maalin kasta. Dharkayga/kabahaygu waa kuwo raaxo leh aana lahayn duleelo ama dil-dilaacyo (ilaa inaan anigu sidaas doorto maahee)			
Waxaan haystaa saadka aan u baahan nahay si aan u sameeyo waxyaabaha aan jeclahay qaarkood			

Bulshada	Fadlan i caawi	Ma aqaano ama ima qusayso	Wax kasta waa caadi
Waxaan booqan karaa meelaha aan jeclahay marar badan asbuuc kasta			
Waxaan si joogto ah waqti ula qaataa dadka aan jeclahay ina daryeela			
Waxaan diidi karaa nashaadaadka bulshada xiliga aan doono kooxdeyduna way qadariyaan dookhayga			
Dadka i taageera ayaa ii sheegay fursadaha aan ugu biiri karo ururada bulshada sida xarumaha dalxiiska ama jiiimka, naadiyada, maktabadaha, xulalka kubada la dilin-dileeyo, kooxaha mutadawiciinta ah, iwm.			
Haddii aan doonaayo, waxaan haystaa fursado, taageero, iyo qalab si aan uga qaybgalo baraha bulshada			
Waxaan haystaa gaadiid igu filan si aan u sameeyo waxyaabaha aan jeclahay			

Xiriirada wanaagsan	Fadlan i caawi	Ma aqaano ama ima qusayso	Wax kasta waa caadi
Marka aan u baahdo, waxaan la kulmi karaa dadka i taageera, si aan ugu sheego waxyaabaha muhiimka ii ah			
Dadka i taageera caadiyan way fahmayaan waxa aan u sheegaayo			
Waxaan helaa taageerada aan u baahnay anoo ku hela tignooloojiyada caawimaada, turjumaano, fasireyaal ama taageerooyin kale			
Waxaan xiriiro qoto dheer la leeyahay dadka kale ee aan ahayn shaqaalaha mushaarka qaata			
Haddii loo baahdo, dadka i taageera ayaa iga caawinaayay dhisida xiriiro aan la yeesho dadka kale			
Haddii aan doonaayo, dhalashayda ayaa la aqoonsadaa ayna u dabaal degaan sanad kasta dadka i daryeela			
Waxaan haystaa qof noloshayda qayb ka ah oo iga taageera xalinta rabshadaha na dhex mara dadka kale (hal tusaale ayaa noqon kara taageero ku aadan xalinta dhibaato iga haysata mulkiilaha guriga oo qalafsan)			

Ilaalinta caafimaadka	Fadlan i caawi	Ma aqaano ama ima qusayso	Wax kasta waa caadi
Haddii loo baahdo, waxaa la i siiyay fursado aan kula kulmo taqasusleyaal si ay iiga caawiyaan dhibaatooyinka caafimaad ee aan qabo (tusaale: dhakhtarka xanuunka, dhakhtarka kala goysyada, dhakhtarka dhimirka, iwm.)			
Waxaa jira qorshe iga caawinaaya joogteynta ama kor u qaadista caafimaadkeyga			
Waxaan haystaa hooy sugan oo leh ciwaan loogu hagaago			
Waxaan ku leeyahay dhul igu filan oo ka banaan gurigayga, fagaaga iyo shaqada si aan u helo caafimaad			
Waxaan haystaa qaabab aan ku sameeyo jimicsi aan jeclahay			
Waxaan heli karaa daryeel caafimaad oo ilaalinaaya dhaqankayga, sida ay ku taliyaan khubarada caafimaad ee ruqsada leh			
Waxaan caawimaad ka heli karaa turjumaan haddii aan ugu baahdo balamaha caafimaadka			
Kooxdeyda ayaa i siisay xog muhiim ah oo ku aadan sida aan naftayda iyo dadka kale uga difaaci karo cudurada caabuqa			

Xuquuqdeyda	Fadlan i caawi	Ma aqaano ama ima qusayso	Wax kasta waa caadi
Kooxdeyda taageerada ayaa i siisay nuqulka xuquuqdeyda waxayna iigu sharaxday qaab aan fahmaayo			
Waxaan ka qaybgalaa nashaadaadka bulshada marka aan doonaayo (tan waxaa ku jiri kara codbixinta, ka qaybgalka kulannada golaha deegaanka ee magaallada, ku biirista baraha bulshada, ka qaybgalka banaanbaxyada, iibsashada funaanadaha ama boorarka muujinaaya kooxaha aan taageero, iwm.)			
Waxaan helaa taageero igu xiro wakiillada ii dooda ama ururada (tan waxaa ku jiri kara gaadiid i gaynaaya kulannada, caawimaad ku aadan wicitaanka qareen, iwm.)			

Kale

Sanduuqyada hoose, ku qor fikradaha muhiimka kuu ah. Tusaale, waxaad ku dari kartaa:

- Waxyaabaha gaarka ah ee aad jeceshahay inaad samayso
- Fasaxyada aad doonayso inaad u baxdo
- Ciyaaraha ama isboortiga aad doonayso inaad dheesho
- Hiigsiyada shaqada
- Waxyaabaha aad jeceshahay inaad soo iibsato
- Wax kasta oo kale oo hagaajin kara nololshaada

Fikradaha kale ee aan qabo: